# GenV Parent/Guardian Information Statement Waalidiinta GenV/Macluumaadka Masuuliyiinta iyo Foomka Ogolaanshaha

## 1. Maxaa keenay GenV?

GenV, waa Generation Victoria oo la soo gaabiyey, waana cilmi baaris Dawlad Goboleedka oo dhan. Wuxuu bixin doonaa sawir buuxa oo caafimaadka iyo samaqabka jiilka oo dhan.

Laba sanadood in ka badan, dhamaan carruurta ku dhalatay Fiktooriya, iyo waalidiintood, waxaa lagu martiqaadayaa inay ka qayb qaataan. Waxaan rabnaa in aan ku darno dhamaan carruuraha iyo waalidiinta, iyada oo aan ku xirnayn cidda ay yihiin ama meeshay ku nool yihiin. Qoys walba way khusaysa - kuwaas oo kuwaagu ku jiraan.

GenV wuxuu ka kooban yahay macluumaadka aad bixiso taariikh ay horay u ururiyeen adeegyo kale. Tan macneheedu waxa weeye waxay qaadanaysaa mudo yar oo waqtigaaga ka mid ah. Cilmi baaris dambe ayaa ka dib heli doonta jawaabaha su'aallo qalafsan oo caafimaad iyo samaqabka su'aallaha ka dheereeya waxaan maanta awoodno.

Waxaan rajaynaynaa in GenV ay caawimi doonto in laga hortago, la saadaaliyo lana daweeyo arrimaha haysta carruurta iyo waalidiinta maanta. Waxaan doonaynaa in aan aragno dhibaatooyin yar sida kuwa dhalida ka hor, ee qof walba.

Inaad qayb ka tahay GenV, waxaad awoodaa caawinta abuurista mustaqbil wanaagsan ee dhamaan qoyska - hadda iyo berriba.

## 2. Martiqaadka inaad ka qayb qaadato GenV

Waxaanu kugu martiqaadaynaa adiga iyo ilmahaaga yar inaad ka qaybqaadataan GenV. Si aad uga qaybqaadato GenV, waxaad u baahan doontaa dhamaadka inaad saxiixdo formka ogolaanshaha. Waxaad heli doontaa koobiga dukumintigaan iyo foomka ogolaanshaha si aad u xafido, waxaana laga hellaa www.genv.org.au.

Ka hor inta aadan go'aansan, waxaa waajib kugu ah inaad fahamto sababta GenV ay dhacayso iyo waxay ku saabsan tahay. Ujeedkayagu waa in xubin ka mid ah shaqaalaha GenV kugu booqdo/ booqato isbitaalka isla marka ilmuhu ku dhasho - waxay kuu sheegi doonaan wixii ku saabsan GenV shakhsiyan. Fadlan weydii su'aal kasta oo aad qabto.

Waxaad kaloo baran kartaa wixii ku saabsan GenV adiga oo akhriyaya dukumintigaan ama ka daawanaya fiidiyowga www.genv.org.au. Waxaad kalooku la xiriiri kartaa emayl genv@mcri.edu.au ama lacag la'aan 1800 436 888 (1800 GEN VVV). Waan ku faraxsanahay in aan ka jawaabno su'aallahaaga.

## 3. Waa maxay GenV?

GenV waa mashruuca ugu ballaaran ebed sahanka ilmanimada ilaa hadda Australia. Wuxuu samaynayaa sawir sida carruurtu u koraan una horumaraan, sida dadku u gaboobo, iyo sida caafimaadka isu bedelo jiilasha. Wuxuu abuuraa dhisida qaybaha isa saaran si uu u caawimo cilmi baarayaasha, bulshada iyo qorsheeyayaasha siyaasada si loo wanaajiyo isbedelka caafimaadka iyo samaqabka oo wada socda. Waxaanu rajaynaynaa inuu noo hogaamiyo daryeel ka fiican oo ka amaasan, iyo jawaabaha qaar ka mid ah su'aallaha horyaalla carruurteena iyo waalidkeen. Laba sano

ka dib, waxaanu ku martiqaadi doonaa in ka badan 160,000 oo carruura iyo waalidiintooda meel kasta oo Fiktooriya ka tirsan oo ah GenV.

Haddii aad ogoshahay, waxaanu kaa qaadaynaa macluumaad iyo sambal adiga iyo ilmahaaga markaad iska qorto GenV, ka dibna marka ilmahaagu koro. Ka dib, markaad ogolaato, waxaanu ku daraynaa macluumaad iyo sambalo ay adeegyadu horay uga qaadeen xaallada caadi ah. Waxaanu gelinaynaa macluumaadkaan meel macluumaadka lagu ururiyo oo amaana oo loo isticmaali karo cilmi baaris mustqabilka ah. Natijooyinku way ka soo raynayaan sidaan ula xaallo, saadaalino ugana hortagno dhibaatooyinka. Waxay kaloo caawimi doonaan kuwa siyaasada hagaa inay sameeyaan go'aano wanaagsan si ay caawinto qoysaska reer Fiktooriya.

Taas macneheedu waxa weeye GenV wax yar ayay kugu qaadanaysaa, laakiin waxay u abuurtaa qoysaska isbedela macna samaynaya. Waxan rajaynaynaa in aan barano caafimaadka qoyska iyo samaqabka muddo dheer.

Mashaariic waaweyn sida GenV ayaa hadaba caawinaya dadka waaweyn ee adduunka. Waxaanu rajaynaynaa GenV inay abuurto faaiidooyinkaan carruurta iyo dhalinta reer Fiktooriya.

## 4. Yaa samaynaya GenV?

GenV waxaa laga hogaamiyaa Melbourne Children's Campus (Machadka Cilmi Baarista (Murdoch Children's Research, Royal Children's Hospital iyo University of Melbourne, oo uu caawimayo Royal Children's Hpospital Foundation). Waxaa kharajka bixiya Xukuumada Fiktooriya iyo Paul Ramsay Foundation. Waxaa kaalmaysa:

- Waxaa caawima dhalidaada iyo Isbitaalka carruurta maxaliga ah.
- Jaamacadaha Fiktooriya iyo Machadyada Cilmi-baarista
- Khubarada hogaaminta Fiktooriya, Australia iyo adduunweynaha
- Qoysas maxali ah iyo bulshooyinka, kuwaas oo caawimay naqshada GenV.

Agaasimaha Cilmi Baaristu waa Professor Melissa Wake, dhakhtar carruureed, waa dhakhtarka ilmaha. Waxaad akhriyi kartaa wixii ku saabsan iyada iyo kooxda inteeda kale halkan.

## 5. Maxaad noo weydiisanaysaa inaan ka qaybgalo GenV?

Muddo laba sano ah, dhamaan carruurta ku dhalatay Fiktooriya, iyo waalidkood, waxaa lagu martiqaaday inay ka qaybqaataan GenV. Waa lagu casumay sababtoo ah ilmahaagu wuxuu ku dhashay Fiktooriya waqtigaas gudahiisa.

## 6. Maxaa GenV ku lug yeelanaysaa?

Xubin ka mid ah kooxda GenV ayaa ku booqday ama kula xiriiray ka dib marki ilmahaagu dhashay - caadatan isbitaalka. GenV ujeedkeedu waa inay u sahasho intii suurtagal ah dadka ka qaybgala. Booqashadu waxay qaadataa qiyaas ahaan 15-20 daqiiqo. Waxaanu sharaxnaa mashruuca, waxaan weydiinaa haddii aad doonayso inaad kala qaybqaadato ilmahaaga, waxaan ku siinaa sahan kooban, waxaana soo jeedinaa qaadista calyada iyo qalabka guriga loo qaadanayo. Arag wax badan oo ku saabsan kuwaan hoos ka fiiri. Haddii ay suurtagal tahay, waxaanu kaloo marti qaadnaa ilmahaaga waalidkiisa kale. Tan ka dib, GenV ayaa kula soo xiriiri doonta badaana email ama farriin dirid.

**Adiga oo ka qaybqaadanaya, waxaad ogolaanaysaa in GenV ay awoodo:**

**(1) In la isu keeno macluumaad iyo sambalo horay u jiray. Kuwaan waxa ka mid ah:**

- Macluumaadka ay adeegyadu horay uga qaadeen adiga iyo ilmahaaga, ka hor inta aan ilmahaagu dhalan iyo mustaqbilkaba. Kan waxaa ku jira macluumaad ku saabsan adiga iyo ilmahaaga xaallada caafimaadka dhimirka, waxbarashada iyo diiwaanka bulshada iyo adeegyada, iyo weliba macluumaadka dhalashada iyo dhimashada. GenV waxay ka heli karaan

wasaaradaha xukuumada, dugsiyada iyo kindergarten-ka iyo isbitaalada, dhakhtarada iyo kuwa kale ee bixiya adeega.

- Macluumaadka la xiriira agagaarahaaga, sida hawada wasakhaysan iyo adeegyada daryeelka ilmaha ee gurigaaga u dhow.
- Sambalada ay kaa qaadeen adeegyada caafimaadku ka hor inta aanu dhalan ilmahaagu iyo adiga ama ilmahaaga mustaqbilka. Marka lagaa qaado dhiiga ama kaadi ama sambal, wixii ka haray sambalka ayaa badanaa la kaydiyaa maalmoh, biloh ama sanado. Waxaan gudbin karnaa iyaga GenV si taxadaran ayaana u daryeeli karnaa. Sambalada ayaa markaas dabadeed loo isticmaali karaa cilmi baaris si ay uga faaiidaystaan qoysasku.

Waxaad akhriyi kartaa wixii ku saabsan wixii aan ka ururinay, iyo sida aan u isticmaalay [www.genv.org.au/for-parents](www.genv.org.au/for-parents).

(2) **Waxaan ku siinaynaa sambal guriga loo qaadanayo.** Haddii aad ogolaato, waxanu qaadi karnaa mid ama laba sambal oo aad dib noogu soo dirto boosta. Waanu kuu sharxi doonaa iyaga dhamaadka booqashadayada ama waa kula soo xiriiri doonaa. Qalabku wuxuu ka kooban yahay:

- Kit-ka suufka naabiga - waxaad ku qaadataa cudbi waxyar oo saxara ah oo aad ka qaaday naabiga ilmaha ka dib markaad ka qaybgasho Genv. Waxaanu kuu sharxi doona sida dhamaadka booqashadayada ama xiriirka. Sambalada waxaa loo isticmaali karaa in lagu barto sida calooshu caafimaadka u saamayso. *Akhri wax badan oo ku saabsan suufka naabiga [halkan](halkan).*
- Kit-ka caanaha naaska - haddii aad naas nuujinayso ama iska lisayso caano, waxaad qaadaysaa malgacad-shaah oo caana ah ka dib markaad ku soo biirto GenV. Tani waxay caawimaysaa cilmi baarista caafimaadka ilmaha iyo hooyada iyo nafaqada. *Akhri wax badan oo ku saabsan sambalka naas nuujinta [halkan](halkan).*

(3) **Lagula sameeyo xiriir samaynayo hadba mar si loola socdo caafimaadkaaga iyo kan ilmahaaga, horumarka iyo samaqabka.** Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in aan fariin ama email kuu soo diro dhowr jeer sanadii, ama kuu soo jeedino qiimayn ilmahaaga isaga oo la arkayo markuu weynaado. Waxaad go'aan ka gaari kartaa markaas haddii aad ka qayb qaadanayso.

(4) **U gal si amaana, ku hay oo isticmaal sambalada iyo macluumaadka.** Markii aanu ku soo biiro macluumaadka aad siiso GenV oo leh macluumaad ka yimid adeegyada sida kuwa kor ku yaalla. Sambaladaan iyo macluumaadka ayaa loo isticmaali karaa mustaqbilka si niyad wanaag ah cilmi baaris la ansixiyey taas oo qancinaysa shucuurta GenV *[arag qaybaha 13 iyo 14 wixii ku saabsan xogta kaydinta]*.

(5) **noo sheeg adeegyada aad adiga iyo ilmuhu kaga jirtaan GenV.**

**Waxaad kaloo dooran kartaa inaad siiso ogolaanshahaaga:**

(6) **Suuf calyada oo cankaaga gudahiisa ama ilmahaaga.** Suuf leh calyo ayaa caawin kara nooc kale oo ah baarista baya-loojiga, kuwaas oo ay ku jiraan cilmi-baarista hida raaca. *Akhri wax badan oo ku saabsan suufka calyada [halkan](halkan).*

(7) **isticmaal sambalada (sida suufka calyada ama kaarka baarista ilmaha yar) baarista hida raaca, si loo barto waxyaalla badan oo ku saabsan sida hidayaashu ula falgalaan waxyaalla kale si loo saameeyo caafimaadka iyo koritaanka.** Kan ayaa laga yaabaa in uu ka caawimo cilmi baarayaasha su'aalla cusub, sida wixi ku saabsan sida xaallada iyo khataraha waalidku ugu gudbiyo carruurta. Mustaqbilka, farsama cusub ayaa laga yaabaa inay suurtageliso noocya kale oo baaritaana. *Ka akhri wax badan oo ku saabsan hidaha [halkan](halkan).*

### *Macluumaad noocee ah ayaa GenV ku ogaan karaan ogolaanshahayga?*

Tusaalayaasha qaarkood waa:

- Caafimaadka jireed iyo maskaxeed: sida Medicare, diiwaanka isbitaalka, koobiyada iskaanada dhijitaalka ah sida ultra sound, macluumaadka laga ururiyey uurkaaga.
- Waxbarashada: sida farbarashada qaranka iyo qiimaynta xisaabaadka dugsiyada haddii ilmahaagu ka qaybqaato.
- Bulshada: sida iinta, kaalmada daryeelka ilmaha/samafalka, gurisiinta, cadaalada.
- Macluumaad guud oo ku saabsan deriska: sida goobaha daryeelka ilmaha, wasakhda hawada.

*Akhri wax badan oo ku saabsan xogta GenV halkan kana fiiri macluumaadka aan aragno sanad kasta halkan www.genv.org.au.*

### *Noocyadee sambalada caadiga ah ayay GenV ku heli karaan ogolaanshahayga?*

Sambaladaas waxaa ka mid ah:

- Baarista dhiiga laga yaabo inaad samaysay qiyaas ahaan 10-12 asbuuc oo ah baarista uurka ilmahaaga xaallada gaara. Akhri wax badan oo ku saabsan 10 ka asbuuc oo baarista halkan.
- Sambalka dhiiga ilmahaaga dhashay kaarkiisa baarista (mudida ciribta) - baarista xaallad aan badanaa dhicin taas oo la daaweyn karo. Haddii aad ku dhalatay Australia, waxaanu iyadana jeclaan lahayn in aan hello kaarkaaga hadduu jiro. Akhri waxyaalla badan oo ku saabsan kaarka baarista ilmaha yar halkan.
- Sambalada kale ee caadiga ah oo laga yaabo in lagu siiyey intii aad uurka lahayd, iyo sambalada adiga ama ilmahaagu inay horay u sii wadaan.

*Akhri waxyaallal badan oo ku saabsan sambalada caadiga ah ee GenV halkan aragna sambalada aan ka hello sanad walba www.genv.org.au.*

### *Maxaa dhacaya marka GenV uu ila soo xiriiro?*

Qiyaas ahaan afar jeer sanadii, GenV ayaa ku casumi doonta si ay kuula socodsiiso sida adiga iyo ilmahaagu tihiin. Is-aragu wuxuu qaadan karaa inta u dhexaysa 3 ilaa 20 daqiiqo. Waxaad go'aan ka gaari kartaa mar walba haddii la buuxinayo. Is-araga waxaa ka mid noqon kara:

- Sahamo kooban iyo cusboonaysiin aad buuxinayso.
- Cabiraada horumarka iyo caafimaadka. Kuwaani waxay daboolayaan waxyaallaha ay ka midka yihiin gaymamka, hadalka carruurta koran, iyo garaaca wadnaha. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaad qaado fiidiyow ilmahaaga ah, ama adiga ama ilmahaaga oo ku cayaaraya gaym alaada elektarooniga sida telefoonkaaga. Waa inay noqdaan kuwa gaaban oo xiisa leh. Akhri wax badan oo ku saabsan cabirka GenV halkan.
- Akhbaarta iyo wixii cusub oo ka yimid GenV. Kani wuxuu ka mid noqon karaa martiqaadyada barashada la shaqaynta GenV.

*Akhri waxyaalla badan oo ku saabsan daraasada la shaqaynta GenV halkan.*

*Waa maxay qiimaynta GenV ee carruurta markay weyn yihiin?*

Qaar ka mid ah caafimaadka iyo qiyaasida horumarka waxaa lagu samayn karaa iyada oo waji waji ah. Waxaanu rajaynaynaa in aan booqano dhamaan GenV ee carruurta markii ay weynaadaan, tusaale ahaan markay bilaabaan dugsiga. Ma aanu qorshayn booqashooyinkaan weli. Waxaanu go'aan ka gaari karnaa waqtiga in aan ka qaybgalo iyo in kale. Si buuxda ayaanu kuula socodsiin doonaa, haddii aan awoodno in aan kula xiriiro. *Akhri wax badan oo ku saabsan booqashooyinka GenV halkan*.

*Maxay Genv ugu sheegaysaa adeegyada in carruurtayda iyo annigu aan ku jiro GenV?*

Adeegyada kale ayaa laga yaabaa inay caawimaan GenV oo leh sahamin gaaban ama qiimaynta inta lagu jiro markaad booqanayso. Tusaale ahaan, ilmahaaga kalkaalisadooda ayaa laga yaabaa inay bixiyaan baaritaan indhood oo ilmahaaga, bixi aragtidaada, oo diiwaangeli isbedelka. Marmarka qaarkood waxaa laga yaabaa inaad guurto ama faahfaahintaadu isbedesho. Adeegyadu waxaa laga yaabaa inay awoodaan cusboonaysiinta GenV ee meesha lagaala xiriirayo ee cusub, haddii aanaan ogeyn inaad rabto inaad ka noqoto. Adeegyada waxaa ku jiri kara caafimaadka iyo kuwa bixiya waxbarashada sida kalkaalisada caafimaadka ilmaha iyo hooyada, isbitaalada, medicare-ka, Centrelink, Kindergartenada, ama dugsiyada.

Lama wadaagno xogta baaritaankaaga iyaga. *Akhri waxyaalla badan oo ku saabsan adeegyada la shaqeeya GenV halkan*.

## 7. Waa maxay faaiidooyinka inaad ku biirto GenV?

GenV waxaa dhici karta ama dhici karin inay toos ugu faaiidayso adiga ama ilmahaaga.

Waxaanu ku siin karnaa jawaabcelin isla markiiba marka adiga ama ilmahaagu buuxisaan sahamada ama qiimaynta. Waxaa laga yaabaa in midaani ku caawinto (arag qaybta 11aad).

Waqti ka dib, GenV waxay ka warbixin doontaa arrima badan kuwaas oo khuseeya carruurta iyo waalidka guud ahaan. Waxaanu rajaynaynaa in GenV ka caawin doonto nolosha carruur badan iyo waalidkood. Waxaanu la waadaagayna natiijooyinkaan guud adiga, waxaana rajaynaynaa in ay wax ku ool kuu noqdaan.

## 8. Sidee ugu xirmi karnaa GenV?

Waxaad saxiixaysaa foomka ka raali noqoshada, waxaana ku siinaynaa koobi aad haysato. Waxaad awoodaa inaad ka qaybgasho dhamaan ama qaar ka mid ah GenV. Markii ay suurtagal tahay, waxaanu rajaynaynaa in labada waalidba ka qaygalaan. Waxaad siinaysaa naftaada ka raalinoqosho. Hal waalid/masuul ayaa bixinaya ka raalinoqoshada ilmahaaga.

## 9. Ma in aan ka qaybgalo baa?

Maya. Adiga ayay kugu xiran tahay. Wax kasta oo aad go'aan ka gaarto, ma saamaynayso daryeelka adiga ama ilmahaagu heshaan. Si kasta ha ahaatee, marka dad badani ka qaybgalaanba, waxaa sii badanaya faaiidada GenV ay yeellato.

## 10. Maskaxdayda ma bedeli karaa mudo ka dib?

Haa maskaxdaada waad bedeli kartaa waqti kasta. Keliya na soo wac ama email no soo dir si aad gal GenV websaytka. Uma baahnid inaad noo sheegto sababta go'aankaaga.

- Haddii aad hadda raali ka tahay, waxaad ka bixi karta mar dambe. *Wax badan ka ogow ka noqoshada halkan.*
- Haddii aadan raali ka ahayn, mar dambe ayaad ka bixi kartaa GenV. Si kasta ha ahaatee, GenV waxaa ka maqnaanaya macluumaadka hore oo adiga iyo ilmahaaga ah. *Akhri wax badan oo ku saabsan soo gelitaanka GenV mar dambe halkan.*
- Marka ilmahaagu koro (14 ilaa 18 sanadood) waxay helayaan fursada ay ku sii wadaan ka qaybqaadashada dad waaweyn ahaan. *Akhri wax badan oo ku saabsan sii wadida GenV halkan.*

## 11. GenV ma bixinaysaa falcelin ku saabsan caafimaadkeena?

Marka iyo ilmahaagu aad dhamaysaan qiimaynta, GenV waxay awoodaa inay ku siiso facelin isla markiiba oo ah natiijooyinka laga yaabo inay waxtar ku leedahay adiga. Warbixintaan kooban waxa laga yaabaa inay sheegto waxyaalla soo socda, ama cidda laga yaabo inaad aragto talo ahaan haddii uu jiro wax welwel ah. Waxaad la wadaagi kartaa warbixintaan kuwa kale, sida dhakhtarkaaga.

Marka laga saaro falcelinta isla goobta ah, ma aanu baarno shakhsiyan xog cusub oo dib la abuuray kana timid goobta xogta ilmaha oo lagu keydiyey xogta ama sambalada. Taas macneheedu waxa weeye GenV kuma ay siin natiijooyin mar dambe adiga.

Taas waxaa sabab u ah:

- Baaritaanada cilmi baarista looma qaabayn daaweyn ahaan - dhakhtaradu waxay isticmaalaan baaritaana kala duwan si loo daweeyo bukaanka
- Cilmi baaristu ma eegto natiijooyin shakhsiyeed - keliya kooxo
- Baaritaano la sameeyey sanada ka hor waxa laga yaabaa in aanay hadda muhiim ahayn ama sax.

GenV waxaa laga yaabaa inay ku siiso fursado aad kaga qayb qaadato mustaqbilka daraasooyin akhlaaqiyan la ansixiyey. Waa dhici kartaa inay bixiyaan falcelin siyaada ah. Waxaad kaloo dooran kartaa inaad ka qaybgasho.

Waxaanu ku dhiirigelinaa GenV cilmi baarayaashooda inay u soo gudbiyaan wixii soo baxay si baahsan - tani waa sida aqoonta cusubi ay ku qabsoomi karto. GenV waxay gelin doonta websaytka macluumaad la soo koobay. Waxaanu rajaynaynaa in kani u yahay wax ku ool waalidiinta. Keliya natiijooyinka kooxaha ayaa la daabacaa - marna lama daabco shakhsi.

## 12. Waa maxay khatarta ku jirta daabacada GenV?

Inaad ka qaybqaadato GenV ma keenayso wax khatar ah ama saamaysa daryeelka aad adiga iyo ilmahaagu heshaan. GenV waxay leedahay nidaamyo  adag oo lagu xafido barayfasigaaga. Tan macneheedu waxa weeye khatarta xadgudubka xogtu aad ayay hoosayasaa.

Waan fahamsanahay in ka qaybgelida GenV u baahan tahay aaminaad. Aaminaada waalidka adoo kale ah waxay keentay wax badan oo la iqtiraaxay taas oo caawinta carruurta iyo dadka waaweyn maanta, dhinacyda caabuqa iyo kansarka. Waxaanu u shaqayn doonaa si adag si looga jawaabo aaminaadaada.

## 13. Sidee nadaamkeena macluumaadku ugu qaabaysan yahay nadaamka GenV?

Nadaamkeena xogta ayaa ah kuwa loo qaabeeyey GenV. Aad ayay u adag tahay dad aan loo ansixini inay galaan nadaamka GenV. Sidoo kale way ka soo horjeeda sharciga. Waxaanu ku kaydinaa macluumaadka oo dhan bay'ad amaana waxaana u samaynaa tijaabin joogto ah oo amaanka. Waxaanu kaloo ilaalinaa macluumaadka shakhsiyeed annaga oo meesha ka saarayna faahfaahinta aqoonsiga (sida magacyada) ku yaalla xogaha isticmaalka cilmi baarayaasha.

Waxaanu isticmaalaa macluumaad shakhsiyeed (sida magacaaga iyo meesha lagaala xiriirayo) si looga shaqaysiiyo GenV. Waa sidaas sida idin kula xiriiri karnaa. Sidoo kale, markaanu galo xoghayaha (qaybta 6aad), macluumaadkan waxaa loo isticmaalaa in lagu xaqiijiyo in aan qofka saxda ah u barbardhigayno. Si aad u aragto habkayaga Ogeysiinta Ururinta Barayfasiga iyo MCRI Nadaamkeeda barayfasiga booqo www.genv.org.au/privacy. Waxaad xaq u leedahay inaad gasho oo aad saxdo macluumaadka shakhsiyeed oo aan ku kaydinay wixii kugu saabsan adiga iyo ilmahaaga sida waafaqsan sharciga barayfasiga. Waxaad samayn kartaa sida adiga oo wacaya GenV.

Ilaa aad noosheegto in aan ka saarno, waan ku haynaynaa xogtaada iyo xogta ilmahaaga ebed. Taas macneheedu waxa weeye GenV ayaa kaalmayn kara wixii la hello sanadaha soo socda.

The Murdoch Children's Research Institute waxaa xira qaanuunka barafaysiga Australia iyo Fiktooriya. Waxay cusboonaysiisaa macluumaadkeeda amniga, nadaamyada IT, waxay joogto u samaysaa nadaamka lagu hagayo. Ujeedo cilmi baariseed, macluumaadka cilmibaarista GenV ayaa laga yaabaa inay sistamka ku hayaan hay'ado kale oo idman. Kuwaani waxay leeyihiin heer isku mid ah oo amaan ah iyo kan barayfasiga.

*Aad u sii akhri wixii ku saabsan xogta amaanka ee GenV halkan iyo qabashada macluumaadkaaga shakhsiyeed halkan.*

GenV waxay samaysaa taxadar siyaada ah macluumaadka qaarkiis, sida goobaha, muuqaalka ama xogaha hidda raaca kaas laga yaabo inuu bixiyo ifafaalayaal ku saabsan yaa qayb ka ah GenV. *Akhri wax badan oo ku saabsan taxadarada GenV halkan.*

## 14. Sidee GenV u isticmaalaan xogahayaga?

Xogaha GenV waxaa loo isticmaali karaa cilmi baarista si loo wanaajiyo, horumarka ama samaqabka carruurta iyo dadka waayeelka ah. Waa inay ka hadlaysaa ansixinta akhlaaqiyaadka leh. Waqti dheeraad ah, cilmi baarayaasha ayaa isticmaali doona dariiqooyin badan oo kala duwan si looga jawaabo su'aallaha cusub ee muhiimkana ah. Sidaas darteed, qiimaha macluumaadkaagu waa sii kordhayaa si uu uga jawaabo su'aallaha muhiimka ah. Dhamaan GenV xogteeda waxaa loo isticmaalaa si qarsoodi ah. GenV waxay leedahay xeerar qalafsan oo ku saabsan aminga iyo cidda isticmaali karta xogteeda.

Ansixinta isticmaalku waxay ku salaysan tahay:

- Cilmi baaristu waxay muhiimada siinaysaa in la wanaajiyo caafimaadka, horumarinta iyo samaqabka
- Isticmaalka la soo jeediyey wuxuu leeyahay ansixin akhlaaqiyadeed
- GenV wuxuu qiimeeyaa amaanka iyo khibrada arjiilaha iyo hay'ada ama ururka.

- Samblada ama xogaha waxaa la isticmaalaa iyada oo aan muujinayn faahfaahinta - sidaas darteed isticmaalayaasha xogaha ma oga inaad adigu leedahay.
- Isticmaalayaashu waxay ogolaadeen xaalladaha isticmaalka ee GenV.

*Akhri wax badan oo ku saabsan ansixinta halkan.*

Kooxda GenV waxay sidoo kale isticmaalaan xogta si ay u hubiyaan horumarka GenV iyo tayada iyo baarista qaybaha xogta. Xogta qaarkeed iyo sambalada ayaa lagu taxliilin karaa sheybaaro takhasus ah Australia gudaheeda iyo adduunka. Tani waa wax badanaa dhaca cilmi baarista waxayna u hogaamisa daah ka qaadid cusub. marmarka qaarkood isticmaalkooda sharciga ayaa ilaaliya wadamada dibada ka ah Australia. Waxaa ku dhacaan hagitaan aad u ilaashan, isla shuruucdaas ayaana lagu ansixiya sida kuwa kore.

Marka cilmi baarayaashu ku shaqeeyaan xogta, badanaa waxay abuuraan xog cusub oo ka timid baaritaanada sheybaarka, ama iyada oo xogta siyaalla cusub. Kuwaan waxaa dib loogu daraa GenV. Tani wxay abuuraysaa fursada badan si loo wanaajiyo caafimaadka.

Shirkadaha ganacsiga ah ayaa dalban kara inay isticmaalaan xogta GenV cilmi baaris ahaan si loo wanaajiyo caafimaadka, horumarinta ama samaqabka. Waxaa waajiba inay buuxiyaan isla shuruucda ansixinta.

Qaar ka mid ah ka qaybgalayaasha ayaa laga yaabaa inay ku soo darsamaan hababka tijaabooyinka cilmi baarista cusub. Dhamaan tijaabooyinku waxay u baahan ansixin akhlaaqiyaad leh. Cida la siiyey qaabilaada cusub ayaa badanaa loo soo saaraa si aan kala soocid lahayn, sida qorituur. Tijaabooyinka qaarkood, dadka keliya ayaa bixiya juhdi cusub oo lala xiriiriyaa wixii ku saabsan ka qaybqaadashada. Xogta GenV waxaa loo isticmaali karaa in la isdhinac dhigi karo natiijooyinka dadka hela iyo kuwa aan helin habka cusub. GenV kuwa ka qaybgala ayaa iyaguna gala barashada ama isdiiwaangelinta xaallada gaara sida dhaawac madaxa ah ama lumitaanka maqalka. Iskudiyada ama barashada ayaa laga yaabaa inay ku weydiiyaan ogolaanshahaga si ay ula wadaagaan GenV, taas oo leh ansixinta akhlaaqiyaadka. Waanu taageeraa midaan.

## 15. Su'aalla intaas ka badan? Wax welwel ah?

GenV websaytka waxaa ku yaalla jawaabaha su'aalla badan. Waxay kaloo leedahay Cadaynta macluumaadkaan.

Si loola xiriiro xubin ka mid ah GenV, fadlan wac 1800 436 888, email-ka genv@mcri.edu.au ama nagala xiriir websaytka. Waxaad kaloo la hadli kartaa qof madaxbanaan oo ka tirsan mashruuca wixii ku saabsan wixii welwel ah ama dacwooyinka, sida loo qabto, ama xuquuqda ilmahaaga ka qaybgeli ahaan. Fadlan la xiriir Agaasimaha Horumarinta Cilmibaarista & Akhlaaqiyaadka ee Isbitaalka Carruurta ee Royal Melbourne tel: (03) 9345 5044 ama rch.ethics@rch.org.au.

**Waad ku mahadsan tahay qadarinta ka qaybgalka GenV.**
**Waxaanu rajaynaynaa ku soo biirida GenV ee safarkaan.**